

DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE		ولاية بونت لاند الصومالية وزارة التربية والتعليم العالي
PUNTLAND GOVERNMENT OF SOMALIA MINISTRY OF EDUCATION AND HIGHER EDUCATION		

Ref: WWTS/225/2021

Date: 22/07/2021

Xayaysiis Qandaraas Maalgalin iyo Daabacaad Buugta Manhajka Dugsiyada Puntland

Ku: Dhammaan Shirkadaha Ganacsiga Puntland ee danaynaya Qandaraaskaan

Ujeedo: Xayaysiis Qandaraas Maalgalin iyo Daabacaad Manhajka Puntland

1. Horudhac:

Wasaaradda Waxbarashadda iyo Tacliinta Sare Puntland iyadoo ka Duulaysa siyaasadda hannaanka wax-wadaagga Dowladda iyo shacabaka -Public Private Partnership (PPP) ee Dowladda Puntland. Ujeedka laga leeyahay hannaankan ay tahay in fursad la siiyo ka qaybgalka ganacsiyada gaarka ah ee bixinta adeegyada dowladda, dhiirigelinta wax soosaarka gudaha, iyo In la dhiirigeliyo hal abuurka iyadoo loo marayo tayo iyo tashiil.

Wasaaradda Waxbarashadda iyo Tacliinta Sare Puntland ka dib markii ay aragtay baahida loo qabo in ganacsatada Puntland ay maalgaliso daabacaadda buugta Manhajka Puntland, si ardayda Puntland ay u helaan buug tayo leh oo qiimo jaban.

waxay wasaaradda Waxbarashadda iyo Tacliinta sare ee Puntland ku casumaysaa shirkadaha iyo Ganacsatada Puntland in ay ka soo qaybgalaan tartanka qandaraaska maalgalinta iyo daabicidda manhajka waxbarashada Puntland. Shirkadaha danaynaya fursaddan waxay soo qoranayaan arji ay ku sharaxayaan codsigooda qanadaraaskan .

Sharkaddii ku guulaysta qanadaraaskan waxaa lasiinayaa qanadaraas muddo dheer ah oo ay ku maalgalinayso kuna daabacayso manhajka Puntland.

Xuquuqda buugta mahajka waxaa iska leh wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta sare Puntland, waxayna hubinaysaa wasaaraddu tayada buugta iyo in qiimo jaban ardayda loogu keeno Buugta manhajka.

2. Masuuliyadda shirkadda laga rabo

- Shirkaddu waxay ka masuul tahay maalgalinta iyo Daabacaadda manjka Puntland.
- shirkadda waxay sii hagaajin naqshadda buugta manhajka sida ugu habboon hadii loo baahdo.
- waqtiga daabicida Buugta manhajka ay shirkaddu haysato waxaa lagu qeexi doonaa heshiiska guud ee shirkadda guulayasta iyo Wasaaraddu ay wada galayaan.
- shirkadda waxay soo gudbin buug tijaabo ah marka hore intaan lawada daabacin buugta si loo hubiyo tayada buugta in ay waafaqsantahay sidii larabay.
- Shirkadda ayaa bixinaysa Kharashka Maalgalinta Daabicidda Buugt, Daabulista iyo keenista buugta.
- Shirkadda ayaa masuul ka ah iibinta iyo qaybinta buugta.

3. Masuuliyadaha Wasaaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Sare Puntland:

- Wasaaradda Waxbarashada Puntland waxay masuul katahay qoridda iyo naqshadaynta Buugta Manhajka.
- Wasaaradda Waxbarashada Puntland waxay shirkadda guulaysata ku soo wareejinaysaa xogta manhajka ee lasoo daabacayo.
- Si xogta manhajka loo xifdiyo Wasaaradda cidkale uma dhiibbayso xogta manhajka aan ka ahayn shirkadda ku guulaysta qandaraaska.
- Tirada iyo tayada buug kasta laga daabacyo waxaa qoraal ku soogudbinaysa Wasaaradda Waxbarashda Puntland.
- qiimaha buugta ardayga laga gadayo waxaa wada dajinaya Wasaaradda iyo shirkadda qanadaraaska ku guulaysata.

4. Faahfaahinta Qandaraaska

<p>Nooca Qandaraaska</p>	<ul style="list-style-type: none"> ✓ Nooca Qadaraaska waa hannaanka Wax-wadaagga Dowladda iyo shacabaka -Public Private Partnership (PPP). ✓ Wasaaradda iyo shirkadda guulaysata oo iskaashanaya ayaa bixinaya adeegga daabacaadda buugta mahjaka Puntland. ✓ Wasaaradda iyo shirkadda guulaysata waxay wada galayaan Heshiis labada dhinac ah oo si faahfaahsan loogu qeexayo masuuliyadda iyo waajibaadka labada dhinac.
<p>Muddada heshiisku soconayo</p>	<ul style="list-style-type: none"> ✓ Waqatiga heshiiska lasiinayo shirkadda guulaysta wuxuu noqanayaa mudo dheer ayna labada dhinac ka wada xaajoonayaan.
<p>Shuruudaha Guud ee qandaraaska</p>	<ul style="list-style-type: none"> ✓ Dhammaan shirkaddaha ka qayb galiya qanadaraaskaan waa inay ilaaliyaan shuruucadda iyo xeerarka Dowladda Puntland ay dhawraanna arrimaha anshaxa iyo akhlaaqiyaadka guud, iyo sidoo kale ay ilaaliyaan xuquuqda aasaasiga ah ee aadanaha iyo bulshada. ✓ Wasaaradda waxabarashada iyo tacliinta sare waxay xaq u leedahay inay diidaan ka qaybgalyaasha aanan buuxin shuruudaha qanadaraaskaan. ✓ Waxaa lala soo xiriirayaa kaliya shirkadda guulaysta.
<p>Faahainta soo xaraynta Qandaraaska</p>	<ul style="list-style-type: none"> ✓ Dhamaan Daneeyaasha Qandaraaskan waxaa lagu war galinayaa inay keenaan warqadaha qandaraaska oo ku jira bushqad afka kaxiran ayna ku soo hagaajiyaan xarunta Garowe ee Wasaaradda Waaxbarashada iyo Tacaliinta Sare ee Puntland-

	<ul style="list-style-type: none"> ✓ Lama aqbalayo qandaraas lagu soo diray hab email ah, lamana qiimayn doono. ✓ Waxii faah faahin aad rabto waxaad ku soo hagaajisaa: ✓ Email: dgoffice.moepl@gmail.com ✓ Telfoon: +252 90 7796450
<p>Waqtiga Qandaraasku dhacayo:</p>	<ul style="list-style-type: none"> ✓ Qadndaraas waxuu dhacayaa Taariikhda iyo waqtigan hoose Taariikhdda uu dhacayo: 05/08/2021 <p>Waqitiga kama danbaysta ah: 04:00pm -Galabnimo</p>
<p>Waqtiga iyo goobta lakeenayo Buugta Manhajka:</p>	<ul style="list-style-type: none"> ✓ Faahaahinta goobta iyo waqtiga buugta lakeenayo waxaa Waxaa lagu qeexayaa Heshiiska ay wadagalayaan Wasaaradda iyo shirkadda guulaysata.

**5- Technical specification for lower primary - grade 1-4 students and teacher guide textbook
(Faahfaahinta xogta farsamada ee Buugta ladaabacayo ee Dugsiga Hoose fasalka 1aad- 4aad)**

No.	Item Description	Number of pages	Book size	Text Colour	Cover Colour	Quality of paper Text	Quality of paper Cover	Binding	QTY	Unit Price USD	Amount USD
1	TextBookand teacher guide	40-50	17.2 x 24.8 cm	4 colour	4 colour	80 gsm	250 gsm One side Lamination	Saddle stitching	1		
2	TextBook and teacher guide	50-70	17.2 x 24.8 cm	4 colour	4 colour	80 gsm	250 gsm One side Lamination	Saddle stitching	1		
3	TextBook and teacher guide	70-90	17.2 x 24.8 cm	4 colour	4 colour	80 gsm	250 gsm One side Lamination	Saddle stitching	1		
4	TextBook and teacher guide	90-110	17.2 x 24.8 cm	4 colour	4 colour	80 gsm	250 gsm One side Lamination	Perfect binding	1		
5	TextBook and teacher guide	110-130	17.2 x 24.8 cm	4 colour	4 colour	80 gsm	250 gsm One side Lamination	Perfect binding	1		
6	TextBook and teacher guide	130-150	17.2 x 24.8 cm	4 colour	4 colour	80 gsm	250 gsm One side Lamination	Perfect binding	1		

7	TextBook and teacher guide	150-170	17.2 x 24.8 cm	4 colour	4 colour	81 gsm	251 gsm One side Lamination	Perfect binding	1		
Total											
Average unit price per textbook											

Item Description	Total Teacher's Guidebook and Pupil's textbook required to Print in the year 2021 Based on EMIS Student Enrolments in 2021	Average unit price per textbook - USD	Total Amount - USD
TextBook and teacher guide	1,040,400 - textbooks		